MUXARRAM

Waa bisha ugu horreysa bilaha sannadka hijriga

Macnaha magacaa

Muxarram macnaha loogala jeedo waa inay xaaraan tahay in la diriro bishaa gudaheed ama lagu dhex falo dulmi iyo macsi, waayo waa mid ka mid ah bilaha uu aad u sii caaggan yahay dagaalka, dulmiga iyo macsida, iyagoo waxyaalahaa goor walba caaggan, bilahaasina waa sii mamnuuc, waxaana loo yiri muxarram waa bishii Ilaahay sharfid iyo weyneyn ahaan, waxaa sidoo kale la yiraahdaa bisha aan shanqar la maqal, caaganaanteeda daran awgeed lagu caagay dulmiga iyo dagaalka.

Waa maxay axkaanta bilaha xurmadda gaar ah leh?

Allaah wuxuu amray in la weyneeyo calaamooyinka sharciigiisa oo lagu dadaalo in la iska jiro waxyaalaha xaaraanta ah bilahaa oo lala yimaado cibaadooyinka, waayo dambiga bilahaa la galo waa ka daran yahay bilaha kale. Allaah Kor ahaaye wuxuu yiri: **"Hubaal, tirada bilahu Ilaahay agtiis waa labo iyo toban bilood xagga Qaddarka Ilaahay tan iyo maalintii uu abuuray samooyinka iyo arlada, waxaa ka mid ah afar xurmad gaar ah leh. Taas baa ah dowga toosan, ee ha ku gardarroonina nafahiinna dhexdooda"** (Suuradda At-Towba: 36).

Waxaana jirtay inay dulimiga iyo dagaalka caagganayeen bilahaa xurmadda gaarka leh xitaa waagii jaahiliyadda ee Islaamka ka horreeyey, waana waxa uga haray diintii Ibraahiim caleyhi salaam, markuu Islaamka yimidna wuu sugay arrinkaa oo hirgeliyey, tixraac Qowlka Ilaahay Kor ahaaye : **"Ee ha ku gardarroonina nafahiina dhexdooda"**. waxayna culimada qaar yiraahdeen waxaa lagu nasakhay xukunkaa caagganaanta bilahaa Aayadaha amraya in lala dagaalo mushrikiinta si aanay u jirin fidmo, iyo in lagu laayo meeshii laga helaba. Halka culimo kale yiraahdeen xukunkeeda waa baaqi, waana sida saxiixa ah ee sugan sida ay caddeynayaan Kitaabka Ilaahay iyo sunnada Rasuulka. Waayo Nabiga s.c.w. bilaha xurmadda ee uu dagaalka galay waa lagu soo billaabay dagaalka isaguse ma billaabin oo wuxuu u dhowri jirey sida Ilaahay amray. Waxaana qofka Muslimka ah la gudboon inuu diintiisa ilaashado oo la yimaado cibaadooyinka iyo axkaanta Islaamka sida uu u amray Allaah.

Fadliga ay leedahay bisha Muxarram

1

Waa bisha ugu sharaf badan bilaha sannadka Ramadaanka kaddib, waxaana loo yiraahdaa bisha Ilaahay weyneyn iyo sharfid ahaan, Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Waxaa bilaha ugu wanaagsan bisha Ilaahay aad tiraahdaan Muxarram" (waxaa soo weriyey An-Nisaa'I, sunan Al-Kubraa 4202)

2

Soonka la soomo bishan waa soon kan ugu wanaagsan bisha Ramadaan kaddib, Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Soon waxaa ugu wanaagsan bisha Ramadaan kaddib soonka la soomo bisha Ilaahay ee Muxarram" (Muslim 1163)

3

Waa mid ka mid ah bilaha xurmadda gaar ah leh, balse waa bisha ugu xurmo weyn ee ugu sharaf badan.

Bilaha xurmadda gaarka ah leh ee uu caaggan yahay dagaalka

Waa afar bilood, uu Allaah amray in la weyneeyo oo caagay dhexdeeda in la diriro dhowris ahaan xujeyda iyo booqdayaasha beyda Ilaahay ee Kacbada si ay ugu gutaan xajka iyo siyaarada si xasillooni leh iyo nabadgelyo. Bilahaa xurmadda gaarka ahi leh waxaa weeye:

waana bisha kow iyo tobnaad ay isku diyaariyaan xujeyda oo ay billaabaan socdaalka xagga Makkah.

waa bisha labo iyo tobnaad, waana bisha la guto xajka.

waa bisha koowaad ee sannadka hijriga, ay u soo laabtaan xujeyda guryahooda.

waa bisha toddobaad, oo waa bil bartahama sannadka ah, si uu awood ugu yeesho qofka doonaya inuu soo siyaarto beytka waqti aan xajka ahayn ugu soo siyaarto si nabadgelyo leh iyo xasillooni.

Maxaa looga dhigay bisha ugu horreysa ee bilaha sannadka?

Markay isku waafaqeen saxaabada sannadkii 16aad ee hijrada waagii uu talada hayey Cumar bin Al-Khaddaab Allaha ka raalli noqdee inay ku billaabaan qorista taariikhda sannadkii hijrada Nabiga sallal laahu caleyhi wasallam , waxay doorteen inay ku billaabaan sannada bisha Muxarram xikmado badan oo ku jira darteed ay ka mid tahay:



1 Waayo waa bisha ay billaabatay go'aanka qaadashada Nabiga s.c.w. inuu u soo haajiro Madiina kaddib la kulankiisa Ansaarta uu kula kulmay Caqabah xajkii kaddib.

2 Waxaa kaloo sabab u ah waa bil ka mid ah bilaha xurmadda gaarka ah leh ee xiga bisha Xajka, oo markay dhammeysteen Muslimiinta waxa xil saaran ee cibaadooyin ah sannadkan ee leh soon iyo xaj, waxaa ku habboon inay ku billaabaan sannadkooda mid ka mid ah bilaha xurmadda gaar ah eh sida ay ugu soo gunaanadeen acmaashoodii bil xurmad gaar leh oo ah xajka.

Maalinta Caashuuraa

10

Waxaa loogu bixiyey Caashuuraa waayo waa maalinta tobnaad ee bisha Muxarram.

Maxaynu u soonnaa **Caashuuraa?**

Markuu Nabigu s.c.w. yimid Madiina wuxuu la kulmay Yuhuudda oo sooman Maalinta Caashuraa, markaasuu wuxuu s.c.w. ku weydiiyey: "Waa maxay maalintan aad soomeysaan? Waxay yiraahdeen:

Maalintan waa maalin weyn uu Allaah badbaadiyey Muuse iyo dadkiisii, oo uu qarqiyey Fircoon iyo dadkiisii, markaasuu Muuse soomay u mahad naqid Ilaahay darteed, innaguna waan soomeynaa, markaasuu Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Innagaa idinka mudan oo xaq leh Muuse idinka"

Markaasuu Soomay Nabiga s.c.w. oo amray in la soomo. (waxaa soo weriyey Al-Bukhaari 3943, Muslim 1130). Marka innaguna waxaynu u soomeynaa ku dayasho Nabiga s.c.w. iyo ku shukrin Ilaahay guusha iyo gargaarka uu siiyey Nabigiisa Muuse caleyhi salaam.

Fadliga Soomidda **Caashuuraa**

Waxaa lagu dhaafaa dambiyada sannadkii dhan ee ka horreeyey, Nabigu s.c.w. wuxuu ka yiri soomidda Maalinta Caashuuraa: "Waxaan Allaah kaga ajar dalbayaa inuu iigu dambi dhaafo sannadkii ka horreeyey" (Muslim 1162)

Waxaana la yiri waa maalinta ugu wanaagsan in la soomo marka laga reebo soonka faralka ah, Ibnu Cabbaas a.k.r. wuxuu yiri "Ma arag Nabiga s.c.w. oo aad ugu dadaalo soomidda maalin aan faral ahayn ka sarreysa maalintan, waa maalinta Caashuuraa" (Al-Bukhaari 2006, muslim 1162)

Heerarka soomiddiisa

Isu eegid maalinta **Caashuuraa** loo eego Maalinta **Carrafo**

Waxaa lagu dhaafaa danbiyada sannadkii ka horreeyey = 354 maalmood

9 Carrafo

Iyo sannadka ka dambeeya = 354 maalmood

Guud ahaan tirada maalmaha = 708

Waxaa lagu dhaafaa danbiyada sannadkii ka horreeyey = 354 maalmood

10 Caashuuraa

Guud ahaan maalmaha= 354 maalmood

12 11 **10** 9 8	12 11 **10** 9 8	12 11 **10** 9 8	12 11 **10** 9 8
In la soomo Maalinta tobnaad oo keliya	Soomidda maalinta sagaalaad, tobnaad iyo kow iyo tobnaad	Waa soomidda maalinta tobnaad iyo kow iyo tobnaad	Waa inaad soomto maalinta sagaalaad ee bisha iyo maalinta tobnaad
Tix gelin guud ahaan xadiiska muujinaya fadliga maalinta Caashuuraa..	Waayo waxaa looga weriyey Ibnu Cabbaas a.k.r. xarafka iyo" Sooma maalin horteed iyo maalin gadaasheed" Al-Bayhaqi - Sunan Al-Kubraa 8406)	Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: " Khilaafa Yuhuudda, sooma maalin horteed ama maalin bacdigeed" (waxaa soo weriyey Axmad 2153, Ibnu Khuzaymah 2095)	Waana heerka ugu fiican heerarka, waana sida uu Nabigu s.c.w. goostay inuu falo, oo wuxuu Nabigu s.c.w. yiri: " Haddaan sii joogo ilaa sannadka soo socdo waxaan soomi doonaa sagaalka " (Muslim 1134) macnaha iyo tobanka bisha Muxarram.

Caashuuraa

iyo dilkii Al-Xusayn a.k.r.

Maaliin Caashuuraa ah sannadkii 61 Hijrada (680 miilaadiga) waxaa dhacay arrin naxdin leh oo murugo badan, waxaa la dilay Al-Xusayn bin Cali bin Abii Daalib, madaxa barbaarta ehlu jannada, wiilkii uu awoowga u ahaa Rasuulka Ilaahay, ay dhashay Faadimah Az-Zahraa, ah mid ka mid ah akhyaarta saxaabada aiyo culimadooda, waxaana lala dilay in badan oo ka mid ah awlaaddiisa iyo reerka qoyskiisa sharafta badan. Waana musiibo weyn oo ku dhacday ummadda, oo ay soo martay musiibo ka weyn markii la dilay Cumar bin Al-Khaddaab iyo Cali bin abii Daalib, waxaana intaa ka hor dhintay Nabiga s.c.w., mana ay ka yeelan mid ka mid ah ilmahoodii iyo gacalladoodii maalintii dhimashadoodii madal sannad kasta la isugu yimaado muujin murugo iyo oohin, haddaba ka warran is dharbaaxid iyo barooro diiq taasoo ah mid ka mid dunuubta waaweyn ee lagu halaagsamo?

MODERN GUIDE

Mashruuca	Muslim Hage sahlan
Farsamda	Xasan Baa Haaruun
Waxaa isku soo dubbariday	Shirkadda ad-daliil al-Mucaasir